يوليو ٢٠١٩ مركز الكتاب للبحوث والدراسات | بوصاصو – الصومال

WAX IS BARIDDA IYO KAALINTA AY KU LEEDAHAY KOR U QAADIDA AQOONTA GUUD

DARAASAD

Xaawo Cali Maxamed

TUSMO

LM	Cinwaanka	Bogga
1	Ururin	2
2	Hordhac	3
3	Gogoldhig	4
4	Sooyaal taariikheed	5
5	Ahmiyadda wax is baridda	6
6	Xirfadaha wax is baridda laga dhaxlo	10
7	Kaalinta wax is bariddu ku leedahay abuuridda fursado shaqo	13
8	Kaalinta wax is baridda ee kor u qaadidda aqoonta	15
9	Gabogabo	17
10	Tixraacyo	19

URURIN

Qormadaan waxay ka hadlaysaa 《Wax isbaridda iyo kaalinta ay ku leedahay kor u qaadida aqoonta guud》, waxayna ku salaysan tahay baahida ay bulshadu u qabto si ay horumar aqooneed u gaarto, manhajka loo adeegsadayna waa manhajka wasfiga (المنهج الوصفي).

Ugu horrayn Qormadaan waxay ka hadlaysaa qeexidda wax is baridda, oo aan kusoo qaadanay erayo kala duwan oo ay culimadu ku qeexeen, sidoo kale ahmiyadda ay u leedahay wax is bariddu ardayga, oo ay ugu muhiimsan tahay kobcinta aqoontiisa, iyo kordhinta kalsoonida uu ku qabo naftiisa, sidoo kale sababaha keenaya in wax la is baro oo ay ugu muhiimsan tahay tayo xumada xarumaha waxbarashada soomaaliyeed marka loo fiiriyo baahida bulshada.

Qaybaha ku xiga waxay qoraagu uga hadashay waxyaabaha looga baahanyahay ardayga wax is baraya, oo ay kamid tahay akhris fudud, iyo fahan sare, sidoo kale xirfadaha wax isbaridda laga helayo oo ay kamid tahay gorfeyn cilmiyeysan, qiimayn waxtar leh, iyo qorsheyn tayeysan.

Ugu dambayntii waxay qoraagu ka hadashay kaalinta ay ku leedahay wax isbariddu abuuridda fursadaha shaqo.

Daraasadaan waxaa kasoo baxay in wax isbariddu ay ahmiyad wayn u leedahay ardayga noloshiisa, gaar ahaan xiliga uu waxbarashada ku jiro.

HORDHAC

Ugu horrayn allaah ayaa mahad iska leh, naxariis iyo nabadgalyo-na nabigeenna korkiisa alle ha ka yeelo, intaas kaddib, waxaan daraasadaan ku samaynaynaa 《wax isbaridda iyo kaalinta ay ku leedahay kor uqaadida aqoonta guud 》, waxaa saldhig u ah daraasadaan qoraaladii horay looga qoray ee tibaaxayey kaalinta wax is bariddu ku leedahay kobcinta aqoonta, anagoo ku salaynayna bulshada soomaaliyeed, qoraalladaas oo isugu jira daraasaado, cilmi baaris-yo, maqaallo, iyo buugaag. Haddaba, qaybta ugu horraysa ee daraasadaan waxaan uga hadlaynaa sooyaalka taariikheed ee ay leedahay wax is bariddu, iyo waqtiyadii ay soo martay, sidoo kale waxaan uga hadlaynaa ahmiyadda wax isbaridda oo ay soo galayaan faa'iidooyinkeeda iyo waxtarkeedaba.

Intaas kaddib, waxaan ka hadlaynaa qaybta ku xigta xirfadaha uu yeelanayo qofka wax is baraya, iyo kalsoonida uu helayo.

Sidoo kale waxaan kaga hadlaynaa daraasadaan kaalinta ay ku leedahay wax is bariddu abuuridda fursado shaqo.

Ugu dambayntii waxaan ku soo gaba gabaynaynaa kaalinta wax is bariddu ku leedahay kor u qaadidda wacyiga iyo aqoonta bulshada.

GOGOLDHIG

Qeexid: Wax isbariddu malahan qeexid kaliya, oo ay isku raaceen culimada iyo cilmi baarayaashu, laakin waxaa jira qeexitaano badan oo kala duwan ayadoo laga fiirinayo dhanka badashada goobaha waxbarasho ee tarbiyadda iyo kuwa nafsiga ah.

Dhanka labaad ee laga fiirinayo ayaa ah kala duwanaanta aragtida iyo fikradaha cilmi baarayaasha, hadana kama baxayaan qeexitaannadaas oo dhan aragtida iyo sida la isku raacsanyahay ee wax isbaridda, waxaana ka soo qaadan doonnaa qayb ka mid ah qeexitaannadaas:
1- Casiis xanaa wuxuu ku qeexayaa inay tahay wax isbariddu: "Habraac loola jeedo in uu isku dayo ardaygu in uu ku kasbado aqoonta, fikradaha, mabaadi'da, dabeecadaha, qiyamka iyo xirfadaha, asagoo adeegsanaya ama ka faa'iidaysanaya barnaamijyada teknoolojiyadda, sidoo kale buugaagta elektorooniga ah, iyo agabka kala duwan ee wax lagu barto".
2- Wuxuu ku qeexayaa axmad mansuur: "waxbarashada loogu talo galay qof kasta ee la jaan qaadaysa waxyaabaha uu daneeyo, boobsiiskiisa shakhsiyadeed, tilmaamihiisa, si loogu talo galay oo manhaj nidaamsan leh".
3- Mr. Tough isaguna wuxuu ku qeexayaa: in ay tahay wax isbariddu "awood uu qofku bixinayo si iskiis ah, oo uu ku abuurayo aragtiyaha waxbarasho, iyo doorashadiisa ilo

waxbarasho oo kala duwan si uu u barto xaqiiqooyinka qaarkood, macluumaadka iyo xirfadaha".
4- D.Rowntree wuxuu ku qeexayaa: asaguna "Hab ay wax isku barayaan ardaydu, ayagoo adeegsanaya qalab kasta ama ilo walba si ay u xaqiijiyaan yoolal cad oo aysan caawin toos ah ka helayn macalinka".

SOOYAAL TAARIIKHEED

Wax is bariddu waxay leedahay taariikh iyo xilliyo ay soo martay oo kala duwan, halkaan ayaana ku sheegi doonaa qayb kamid ah.

Wax is bariddu waxay soo jirtay waqti dheer oo ay dhaqan galinayeen dadkii joogay xiliyadaas sida buugaagta taariikhdu sheegtay.

{Wax is bariddu waxay soo jirtay qarniyo hore, waxaa taageeray Arsadoo[1] iyo Aflaadoon[2] iyo Saqraad oo ah falsafayahanno noolaa dhalashadii nabi Ciise ka hor, waxayna u adeegsadeen

[1] **Aristo (322 ilaa 384) ayuu noolaa dhalashadii nabi Ciise ka hor, الموسوعة الحرة ويكيبيديا.**

[2] **Aflaadoon (347 ilaa 427) ayuu noolaa dhalashadii nabi Ciise ka hor, الموسوعة الحرة ويكيبيديا.**

muxaadarooyinkooda iyo casharadooda[1].

Sidaas awgeed Wax barashada ku dhisan aqoonta wax barista waxay heshay la jaanqaad laga soo bilaabo waqtigaas hore, ayadoo la adeegsanayo buugaagtii ay heli kareen dadka naftooda wax barayey, sidoo kale wax isbaridda waxaa la adeegsaday xiligii xadaaradda islaamka ayadoo loo marayo jidadka waxbarasha tarbiyada islaamka, taas oo adkaynaysay ardayga qaabka uu wax u baranayo iyo wax ku haboon awoodihiisa iyo aqoontiisaba.

AHMIYADDA WAX IS BARIDDA

Waxbarashadu waa furaha aqoonta, wax isbaridduna waa furaha xirfadaha. qofku wuxuu marayaa noloshiisa heerar kala duwan oo uu u baahanyahay in uu leeyahay xirfado uu u iisho marka ay dantu ku kalifto marka kalena u adeegsado shaqadiisa, sidaa darteed waxaa qof walba la gudboon in uu yeesho xirfadda wax is baridda, goobaha wax barashadu fure ayey siiyaan ardayda ee ma siiyaan aqoon buuxda, wax is baridduna waxay bundhig u tahay aqoon tayo leh oo uu qofku helo.

Wax is bariddu waxay

[1] اتجاهات عينة من طالبات جامعة الملك سعود نحو التعليم الذاتي/خليل بن إبراهيم السعادات

leedahay faaiidooyin badan, qof kastana waxay u leedahay ahmiyad in uu wax is baro, si gaar ahna waxay ahmiyad iyo faaiido ugu leedahay ardayga, oo ardayga kuma filna waxa uu macalinka ka qaadanayo mana buuxin karto baahidiisa uu u qabo in uu ogaado waxyaabo badan oo kala duwan, waxaanna u qaybinaynaa dhawr qaybood: ahmiyada ay u leeyahay ardayda jaamacadda ka hooseeya, iyo ahmiyadda ay u leeyahay ardayda jaamacadaha dhigta, mid kastana gaarkeeda ayaan uga hadlaynaa.

■ ahmiyadda ay u leeyahay wax isbardidu ardayda jaamacadda ka hooseeya: adayda jaamacada ka hooseeya wali waxay ku jiraan xaalad gacanku hayn ah oo waalidka iyo macalimiinta ayaa gacanta ku haya' xiligaasna waa xiliga ay samays maso shaksiyada qofka waana xiliga ugu haboon ee uu qofku wax isbari karo, waalidka iyo macalimiintuna waxaa haboon in ay ku dhiiri gashaan, waxaa muhiim ah ayana hagida waalidka ay ardayga hagayaa una tilmaamayaan in ay tahay waxa uu soo qaatay fure loogu tala galay in uu ku furto furayaashaas meelaha loogu tala galay, sidoo kale waxaa muhiim u ah ardayga dhiiri galinta waalidka iyo maclimiinta.

Xirfadaha laga helayo wax isbaridda.

1- akhris badan ,ardaygu markasta oo uu wax badan akhriyo waxaa u fududaanaya wax akhriska aqoonna wuu faaiidayaa.

2- qorid badan, markasta oo ay badato wax akhrisida

waxaa baranayaa qofku erayo badan iyo fikrado ku soo dhaca kadibna wuxuu u badalayaa qoraan uu isagu keensaday taasna waxay badinaysaa wax qoridda, sidoo kale wuxuu qorayaa waxyaabaha ahmiyadda u leh oo uu akhriyo iyo waxa ku soo dhaca.

3- aqoon kororsi, markasto oo uu ardaygu wax isbaro waxaa u siyaadaya macluumaad cusub oo uusan horay u ogayn.
■ ahmiyada ay u leeyahay wax isbaridu ardayda jaamacada: wax isbariddu waxay u leedahay ardayga jaamiciga ah dhawr ahmiyadood oo kala ah sidaan.

1-akhris badan ,ardaygu markasta oo uu wax badan akhriyo waxaa u fududaanaya wax akhriska aqoonna wuu faaiidayaa.
2- qorid badan, markasta oo

ay badato wax akhrisida waxaa baranayaa qofku erayo badan iyo fikrado ku soo dhaca kadibna wuxuu u badalayaa qoraan uu isagu keensaday taasna waxay badinaysaa wax qoridda, sidoo kale wuxuu qorayaa waxyaabaha ahmiyadda u leh oo uu akhriyo iyo waxa ku soo dhaca.

3- aqoon kororsi, markasto oo uu ardaygu wax isbaro waxaa u siyaadaya macluumaad cusub oo uusan horay u ogayn. Qofku wuxuu marayaa heerarkala duwan oo uu baahanyahay in uu leeyahay xirfado uu u iisho marka aydantu ku kalifto marka kalana uu ku xoojiyo u qalmidiisa shaqo, waxaa ahmiyad gaara leh dadaalka uu qofku ku dadaalayo in uu wax isbaro xirfadihiisana kor u qaado. .

■ maxaa ku kalifaya in uu qofku wax isbaro: waxaa jira waxyaabo keenaya in wax la isbaro waxaa ka mida sababahaas sigaanara u haysta ardayda iskoolada iyo jamacadaha soomaaliya ka dhigta.
1- waxbarasho soo jireen ah oo aan la hormarinayn lana jaanqaadi karin waxbarshooyinka casriga aanjoogno gada iyo kuwa soo socda oo aan lahayn wax dhaqan galina ama qaabab cusub oo uu macalinku laimaado dariiqo kaliya ayey wax u dhigaan macalimiinta soomaalida oo ah soojeedin iyo maxaadaro oo aan la socon xirfad dhaqameed, sidoo kale aan anfacayn arday jaamacadeed oo u baahan nashaad iyo in uu maskaxdiisa maalo oo asagu keeno xalka mushkiladaha ogaadana wax cusub.
2- jaamacadaha oo aan haysan qalab iyo agab fiican oo ay ardayda tadbiiq ku sameeyaan taas oo kalifaysa in jidka soo jireenkaa la iska hayo wax isbadalana aan la samayn.
3- ardayda soomaalida oo aan aqoon xirfadaha wax la isku baro oo macalinka wax uun ka suga ee aan la imaanayn wax dhaqdhaqaaqa badankoodu taas oo kalifaysa in uu macalinkii asagu keeno xalka mushkiladaha iyo waxkasta oo fasalka ka dhacaya ardaygiina uu ku kaaftoomo waxa uu malinka kabarto taasna ay ka sii dhalato in ay soo baxaan arday aan u qalmin shaqooyinka ay qabanayaa ama la dhaliilo wax barashada jaamacadaha soomaaliya ardayduna ay fadilaan in ay dibada ku soo qaataan jamacadooda.
4- dhibaarada ka haysata

ardayda teknoolajiyada oo aysan aqoon, iyo teknoolajiyada oo noqotay wax meelkasta ka shaqaynayo shaqa kastana aad uga shaqaynaysid ugu yaraan adigoo arday ah markii baxsi laguu diro waxaa lagaa rabaa in aad soo tayb garaacdo ardayduna badankoodu mayaqaanaan kumbuyuutar waayo iskuulada iyo jaamacadaha wax wayn laguma qaato oo uu ku barankaro ardaygu, hadii uu ku dadalo wax isbarista asagaa barankara.
5- danta laga leeyahay waxbarashada jaamacada oo noqotay in ardayda wax la xifdisiiyo si ay imtixaanka uga gudbaan.

XIRFADAHA WAX IS BARIDDA LAGA DHAXLO

Wax isbaridu waxay leedahay waxayaabo looga baahan yahay qofka wax isbaraya in uu ku tilmaanaado si ay ugu suurta gasho in uu wax is baro waxaana ku soo koobaynaa qodobada soo socda waxay u qaybsamaan 4 qaybood oo ah sidatan 1- wax akhris, 2- wax qorid, 3- wax fahmida, 4- diiwaangalinta macluumaadka.

1- wax akhriska iyo 3- wax fahanka: waxay u sii qaybsamayaan sidaan, ♤ in aad fahanto macnaha ay xanbaarsan yihiin erayada adag.

♤ in aad fahmi karto sida uu u nidaamsan yahay qoraalku.

♤ in aad fahmi karto

aqoonta lagu barayo iyo sawirada macnaha ay xanbaarsayihiin.

♤ in uu yahay wax akhriskadu mid maruuna iyo sahlanaan ku jirto.
2- wax qorida: ayana waxay usii qaybsantaa dhawr qaybood oo ah sidaan: ♤ in aad u soo diyaargarowdo in aad wax qorto, ♤ in aad u qorto sida ay u kala horeeyaan, ♤ in aad u qorto qaab faqra faqra ah, ♤ in aad hubisid waxa aad qortay si fiicana aad u hubisid oo tawsiiqi ah, ♤ in aad diiwaan galisid waxyaabaha kugu soo dhacaya.
4- diiwaangalinta macluumaadka: horay ayaa loo yiri: ﴿ wax aqoontu waa ugaartii wax qoriduna waa xarigii ee ku xir ugaarta xariga﴾ waxa aan diwaan galinayno ma ahan wax khasta oo aan maqalo ama daawano ee waa wixii ku cusub oo uu maqlo iyo macluumaadka muhiimka ah oo ah ee uu akhriyo meel kasta haka akhriyee [1].

■ xirfadaha wax isbaridda laga helayo:

Wax isbarida waxaa laga heliyaa xirfadahaan soosocda.

1. Xirfada qorshayn tayeysan, waa xirfad muhiim u ah qofka noloshiisa oo wuxuu baranayaa sidii uu noloshiisa u kala maarayn lahaa.
2. Xirfada wax raadinta, waxay kuu fududaynasaa in aad barato sida loo raadiyo

[1] كتاب "التعلم الذاتي للطلاب" للدكتور أ.د. ريما الجرف، ص ١٠

macluumaadka loogana raadiyo ilaha saxda ah.

3. Xirfada fakarka wax naqdinta, waxay ka saacidaysaa qofka in uu san ku dhicin erayo aan haboonay ee uu sifiican uga fakarto waxa uu akhrinayo ama qorayso.
4. Xirfada wax qaymayn waxtar leh, waxay u sahlaysaa in uu qaymeeyo qofku waxwalba oogaadana qaymaha uu leeyahay[1].
5. Gorfayn cilmiyeysan, waa xirfad muhiim u ah qofka waayo lagama maarmo in uu qofku si cilmiyeysan wax u gorfeeyo.

■ ku kalsoonow naftaada si aad wax isku bartid: In uu qofku ku kalsoonaado naftiisa waxay u taraysaa waxyaabo badan ma ahan aqoon kaliya iyo in ay u fudaynayso in uu wax isbaro lakiin kalsoonida qofku uu isku kalsoonyahay waxay u tartaa una fududaysaa waxyaabo aanaan halkaan lagu soo koobikarin waxaana ka soo qaadanaynaa kalsoonida qofku in ay u sahlayso in uu wax is baro.

Faaii'dooyinka laga helo wax isbaridda iyo kubcinta kalsoonida waxay qofka bartaa in uu garto inuu mas'uul ka yahay go'aanaddiisa. Taasoo kor dhinaysa isku kalsoonaantiisa.

---

[1] **ما هي المهارات التي تحتاج اليها في التعلم الذاتي 27 8 2017**

Sidaas dartideedna wuxuu awood u yeeshaa inuu dhibaatooyinkiisa u xalliyo sida ugu haboon, wuxuuna u istaagayaa in uu ku xalliyo go’aanka ugu fiican wax nolol maalmeedkiisa ah[1].

KAALINTA WAX IS BARIDDU KU LEEDAHAY ABUURIDDA FURSADO SHAQO

Hadii aan soomaali nahay waxaa nagu badan shaqa la'aanta ama baagga muudada waxaa dhacda dad badan oo dugsiyo sareka iyo jaamacado ka baxay oo aan shaqo haysan, waxaaba la helaa kuwa mastar ah iyo kuwa digrooraa ah oo shaqa la'aan ah sanawaad oo laga yaabo in ay wadanka dibadiisa wax ku soo barteen qarash badana uga baxay.

Hadaba wax isbariddu waxay fursad siinaysaa in uu qofku abuurto shaqo ka duwan ama lamida wixii uu takhasuska ku soo qaatay waayo asagaa isbaraya

[1] ما هو التعلم الذاتي تعزيز الثقة بالنفس

xirfado wax yaabo uu qofku samayn karo taas oo ay u fudaynayso teknoolajiyada oo uu ka helayo waxkasta oo uu u baahanyahay in uu isbaro sidaas ayuuna shaqo ku abuuranayaa lajaan qaadaysa hiwaayadiisa iyo waxyaabaha uu jecelyahay ee uu samaynkaro hala mid ahaato takhasuskiisa ama haka duwanaatee, waxaana uga hadlidoonaa faqrooyinka soo socda.

helitaanka koorsooyin bilaash ah iyo agabyo, wax isbarid ayaa ka sahlan sidii hore, qofku wuxuu heli karaa waxbarasho wanaagsan oo wuxuu bilaabikaraa hormarinta naftiisa, iyo dhisidda xirfadihiisa, waxbarashadda lafteedu ma'ahan in ay ku xirnaato khibrada barashada iskuulka iyo jaamacada, (waxbarashadu waa nolosha uu qofku ku noolyahay laga bilaabo markii uu bilaabay wax akhriska).

Si kasta oo aad mashquul u tahay, ama ay culaysyada shaqada kugu badan yihiin in aad waqti u goyso wax isbarida iyo kasbashada xirfado cusub ayaa kaaga filan badalida noloshaada iyo in aad badisid mushaarkaada sida fiican.

Badanaa qofna ma dareemayo hanashada iyo isku filnaanta marka laga reebo aqoonta iyo helitaanka xirfado kala duwan marwalba, haddii aad u malaynaysid aqoonta iyo wax barashadu in ay xun yihiin oo caajis badan tahay, inta badan kama tilaabsandoontid si aad u shaqaysid, maalin ayaa imaanaysa aad dareemidoonto in aysan

xirfadahaagu qiimo ku lahayn suuqa shaqada, wax isbarida iyo kor isu qaadida ayaa noqotay wax lagama maarmaan ah waqtigaan joogno hada[1].

KAALINTA WAX IS BARIDDA EE KOR U QAADIDDA AQOONTA

Halkaan waxaan wax ka orondoonaa waxa loola jeedo kor uqaadida aqoonta guud ee bulshada ama qofka waxayna noqonaysaa sida tan.

Waxaa loola jeedaa aqoon, aqoontu waa eray gadiim ah waxaana ka mid ujeedkeeda dareen, hagaajinta qofka, qofka wax bartayna waa kan naftiisa bari kara waxyaabo cusub si joogto ah, waxaa loo isticmaalaa erayga aqoon qarnigaan joogno si ay kuu tusto kor ahaanta fikirka iyo dhaqanka bulshada koox ahaan iyo kalikaliba sidoo kale waxaa loo adeegsadaa erayga aqoon si uu kuu tuso kala

[1] التعلم الذاتي شرارتك لتبدأ حياة مهنية عظيمة

duwanaanta sayniska bini aadamka iyo waxa loo yaqaan aqoonta sare.

Ogaanshaha iyo aqoontu waa laba erayo dabacsan oo la xiriira da'beecada aadanaha bulshada horumariteeda iyo hal abuurnimadeeda iyo nashaadaadkeeda cilmiyeed tan iyo waliyeed,ogaanshuhu wuxuu ku hormaraa ku celcelinta bulshada ee nololeed iyo habka uu ula dhaqmayo cida ku hareeraysan ee dadka ah iyo aqoonta uu u leeyahay intay le'egtahay iyo la dhaqankiisa waxyaabaha ku hareeraysan ee caadiga ah, waxa soocaya ogaanshaha qofkana waa awoodiisa uu u leeyahay qaadashada go'aanada, iyo aqoonta uu u leeyahay dhaqankiisa gaarka ah iyo kanguudba, meesha fikradaha dadka badankoodu ay yihiin natiijada ay hormarinta ka soo saaraan wax walba oo agab ah, waxaa jira khilaaf u dhexeeya jirtaanka bulshada iyo ogaansha bulshada halka uu yahay jiritaanku maadi ogaanshuhuna fikri.

Teknoolajiyadda casriga iyo kacaanka isgaarsiinta xaaraha leh waxay balaariyeen muuqaalka bini aadamka waxayna sare u qaadeen aqoontooda, raadinta joogtada ah ee waxaas oo dhan waa habka saxda ah ee korloogu qaadi karo aqoonta iyo ogaalka bulshada, waxaana ugu horeeya ogaanshaha iyo aqoonta bulshada, dhaqanka iyo luqada ku ma gaarayaan si farsamo ah jiilka soo socda, halka ay noqonayaan waxa ugu muhiimsan ee wax

dheeraynay korna u qaadaya ogaanshaha iyo aqoonta faafinayana gaar ahaana gooba xiriirka ee hormaray ee la socda teknoolajiyadda qarnigaan cusub, markaasna wuxuu noqon bini aadamku wax soo saare hal abuur ku leh aqoonta, wuxuuna asaas u yahay aqoon abuurista iyo hal abuurka wax kasta oo cusub[1].

GABOGABO

Allah ayaa mahad oo dha u sugnaatay, naxariis iyo nabad galyana nabigeena du shiisa ha ahaato, allah ayaa na solansiiyey in aan daraasadan samayno nana waafajiyey allah waxaan waydiisanaynaa in uu ka dhigo mid wax tar leh anagana ajar iyo xasanaad nagasiiyo.

Intaaska dib daraasadaan oo aan ku samaynaynay wax isbaridda in taas ayaan ku soo gabagabaynaynaa.

[1] مفهوم الوعي الثقافي ٢٠١٧

Talooyin:

Baaxisadu waxay ku talinaysaa talooyinka soo socda:

1. In la sameeyo daraasooyin iyo cilmibaarisyo ku saabsan mzwduucaan.
2. In ay ardaydu ku dadaalaan in ay wax isbaraan reerkata oo ay marayaan.
3. In macalimiinta iyo waalidku ku dhiiri galiyaan ardayda in ay wax isbaraan.
4. In ay shaqaalulu ku dadaalaan in ay shaqadooda kor u qaadaan intay kari karaan
5. Bulshadu waa in ay sameeyaan meelo xirfadaha lagu barto si loo gacan qabto ardayda wax isbaraysa.

TIXRAACYO

١- الموسوعة الحرة (ويكيبيديا).

٢- اتجاهات عينة من طالبات جامعة الملك سعود نحو التعليم الذاتي/خليل بن إبراهيم السعادات.

٣- كتاب "التعلم الذاتي للطلاب" للدكتور أ.د. ريما الجرف.

٤- ما هي المهارات التي تحتاج اليها في التعلم الذاتي ٢٠١٧ ٨ ٢٧.

٥- ما هو التعلم الذاتي تعزيز الثقة بالنفس.

٦- التعلم الذاتي شرارتك لتبدأ حياة مهنية عظيمة.

٧- مفهوم الوعي الثقافي ٢٠١٧.